PATIENT EDUCATION

# Mindhicirada
(Colonoscopy)

## Waa Maxay Kaamerada Lagu Eego Mindhicirada?

- Kaameerada mindhicirada lagu eego waa baaritaan lagu sameeyo bukaanka iyada oo isbitaalka la dhigay ama aan la dhigin uu dhakhatarku ku eego mindhicirka weyn (mindhicirada iyo malawadka).
- Kaamerada waxaa inta badan loo adeegsadaa in lagu qiimeeyo xanuunada caloosha ku dhaca sida dhiig ku yimaada malawadka, mindhicirada, xanuun caloosha ah, ama isbedel ku yimaada saxarada bukaanka.
- Waxa kale oo kamerada lagu eegaa dadka aan calaamado lagu arag laakiin cad (koraya) laga soo gooyey ama kansar laga baarayo. Taas waxaa lagu magacaabaa kaameerada baaritaanka, waxaana lagula taliyaa dadka da'doodu tahay 45 sano ama ka weyn, ama waalidkood, walaalahood uu horey ugu dhacay kansarka ku dhaca mindhicirada ama hilib (koraya) lagu arkay.Baaritaanka mindhicirada ee caadiga ah waa muhim waayo waxaa lagaga hortagaa kansarka ama marka xilli hore la ogaado daaweyntiisu fududahay.

## Maxaa lagaa doonayaa ka hor inta aan kaamerada lagu eegin?

- Waxaa lagu siinayaa tilmaamaha daawo caloosha lagu nadiifiyo iyo cuntada aad cuneyso oo dhakhtarkaagu boostada kuugu soo dirayo.
- Si loogu guuleysto kaamerada lagu eegayo mindhicirada, waa in jirkaagu raashin ka maran yahay si dhakhtarku u arki karo. Waa in aad akhriso oo aad raacdo tilmaamaha diyaarinta caloosha ee dhakhtarkaagu ku siiyo.Haddii aanu jirkaaga marneyn, si hagaagsan looma arkayo mindhiciradaada waxaana suurogal ah in la baajiyo.

## Waa maxay diyaarinta caloosha?

- Colonoscopy waa baaritaanka ka hortagga wuxuu isu bedeli karaa colonoscopy baadhista haddii dhakhtarku helo meel loo baahan yahay tijaabin ama daaweyn loo baahan yahay. Sidaa darteed waa lagama maarmaan in la fahmo kaar caafimaadkaaga inta aan habka la gaarin. Telefoonku wuxuu ku qoran yahay dhabarka dambe ee kaadkaga caafimadka.
- Diyaarinta caloosha waa loo baahan yahay si loo sameeyo baaritaanka kaamerada. Diyaarinta caloosha waa hab lagu nadiifiyo jirka oo qashinka looga saaro si dhakhtarku u arki karo.
- Dadka qarkood waxaa laga yaabaa in aysan jeclaysan diyaarinta caloosha taasoo ka niyad jabisa in ay sameeyaan baaritaanka.
- Diyaarinta caloosha waxaa ka mid ah cunto gaar ah oo aad cunto, in aad cabto ilaa gaaloon daawada caloosha jilcisa ah, iyo mararka qaarkood enemas si ay u nadiifiso mindhicirada.
- Marka aad ogsoontahay waxa aad ku gaareyso ayaa laga yaabaa in ay cabsida kaa qaado kaana caawiso in aad isu diyaariso kaameerada.

## Maxaad fileysaa in ay dhacaan inta aad diyaarineyso caloosha?

- Waxaa laga yaabaa in lagu faro in aad bilowdo diyaarinta caloosha maaalin ama laba maalmood ka hor maalinta baaritaanka.
- Marka ugu horeysa ee aad bilowdo diyaarinta caloosha, waa in aadan ka ag fogaan suuliga.
- Taasi waxa ay ka dhigan tahay in aadan ka bixin guriga oo shaqada aad ka joogto. Waxaa suurogal ah in habeenka ka hooreeya baaritaanka aad suuliga aad u isticmaasho.Isku day in aad xirato dhar aad degdeg isaga bixin karto. Suuliga aad ayaad u isticmaaleysaa.
- Waxaan kugula talineynaa in aad si wanaagsan isaga nadiifiso marka aad suuliga isticmaasho. Haddii aad warqadda suuliga isticmaaleyso, isticmaal midda jilicsan.
- Waxa kale oo aad isticmaali kartaa shukumaan diiran halkii aad warqad adag ka isticmaali laheyd. Dadka qaarkood biyo diiran oo ay isticmaalaan ayaa ka rayeeya xanuunka ka dhasha saxarada faraha badan. Waxba ha ku darin biyaha saabuunta qaarkeed waxa ay xasaasiyad ku keentaa dabada.

## Maxaan filayaa inta uu socodo baaritaanka?

- Inta uu socdo baaritaanka, waxaa laguu xirayaa dharka dhakhtarka oo kaliya. Dhinaca bidixda u seexo ayaa lagu dhihi doonaa inta uu socdo baaritaanka.
- Waxaa lagu siin doonaan daawo aan kuwada suuxin laakiin hurdo hurdo ku gelisa. Dhab ahaantii, bukaanka intiisa badan wuu seexdaa inta uu baaritaanka socdo oo dhan waxna kama xusuustaan.
- Marka daawadu jirkaaga gasho, xaga malawadka ayaa kaameerada lagaa soo gelinayaa iyadana ayaa mindhicirada kor u raaceysa oo la leexleexaneysa. Marka kaameeradu dhex mareyso mindhicirada, dhakhtarku waxa uu mindhicirada ka fiirsanayaa telefishin. Baaritaanka oo dhan waxa uu qaadan karaa 30 daqiiqo ilaa saacad.

## Maxaan filayaa baaritaanka ka dib?

- Waxa aad u baahaneysaa qof aqalka kuu qaada. Waxaa lagula talinayaa in qof guriga kula joogo baaritaanka ka dib. Dhaqdhaqaaqa caadiga ah waad la iman kartaa adiga oo cuni kara cuntada caadiga ah.
- Dhakhtarkaaga ayaa kuu sheegaya waxa uu arkay marka aad ka tageyso isbitaalka In laguu soo diro natiijada sheybaarka cad laga soo gooyey jirka waxa ay qaadaneysaa ilaa laba todobaad.
- Waxaa dusha lagaa eegayaa ilaa 40 daqiiqo oo lala soconayo cadaadiska dhiigga, garaaca wadnaha, iyo habka neefshada 10 kii daqiiqaba hal mar.
- Inta aadan ka bixin qeybta baaritaanka kalkaaliye caafimaad ayaa kuu akhrinaya warqadaha kala saaridda isbitaalka.
- Qaraabadaada ama saaxiibadaa way kula joogi karaan mudada kor lagaa eegayo haddii aad dooneyso.
- Haddii dhakhtarkaagu ku arko midhicirka cad dheeraad ah (koraya) ama aan caadi aheyn waxa ay ku taliyaan in aad baaritaan dheeraad ah sameyso ugu yaraan sadex bilood ka dib taasoo ku xiran xajmiga iyo tirada cadka dheeraadka (koraya) ee uu dhakhtarku arkay.
- Waxaa laga yaabaa in aad dareento dibiro waayo hawo ayaa mindhicirada lagu furay intii baaritaanku socday. Inaad dhuus dhuusto waxa ay kaa yareyneysaa cadaadiska